Hagaha Gunnada Canshuurta
(Maarso 2008)

Horudhac

Habka bixinta kaalmada iyo Gunnada Canshuurta ee UK aad ayuu u dhib badan yahay. Waxaa jiraan nidaamyo ka reebaayo dadka aan xaqqa u lahayn inay si joogta ah ugu noolaadaan UK inay soo codsadaan. Soo codsiga kaalmada marki ay jiraan xaaladahaas waxay raad ku yeelanayaan joogistaada UK. Waxay sidaan micnaheedu yahay in dad badan oo leh keliya xaqqa joogista ku meel gaarka ah ee UK, sida arday badan iyo dadka booqashada ku imaanayo, ma codsan karaan kaalmada gabi ahaan, xitaa haddii ay lee-yahiin carruur curyaamiin ah.

Haddii aadan hubin inaad u lee-dahay xaq inaad ugu noolaatid si joogto ah UK, ka soo wac khadka La xiriiridda Qooyska (Contact a Family helpline) oo ah 0808 808 3555 si aad u heshid talo ka hor intaadan samayn wax coodsi ah. Waxaan kuu qabanqaabin karnaa tarjubaan telefoonka haddii aad u baahan tahay.

Haddii aad xaq u lee-dahay inaad ugu noolaatid si joogto ah UK- tusaale haddii aad lee-dahay jinsiyadda Biritish'ka ama lagu siiyay sharciga qaxootida ama sharciga badbaadinta aadamiga - markaa waxaa jiraan kaalmooyin iyo Gunnada Canshuurta oo baaxad leh oo aad soo codsan kartid.

Tusaale ahaan, inta badan dadka haystaan carruurta curyaanka ah oo u baahan in la xanaaneeyo carruurta kale ka badan, ama haysto carruur dhibaatooyin ka haysto socodka waxay heli karaan Gunnada Xanaanada Curyaanimada. Waxaa la bixiyaa haddii aad shaqaysid ama aadan shaqayn waana ugu saraysaa kaalmooyinka kale ee aad qaadatid. Waxay waaliddiin badan soo codsan karaan xitaa Gunnada Xanaanaynta si ula joogaan carruurtooda. Inta badan qooysaska jooga UK, haddii laga reebo kuwa qaato mushaharka ugu sareeyo, waxay weliba xaq u lee-yahiin qaar ka mid ah Gunnada Canshuurta.

Waxaan telefoonka kuugu samayn karnaa inaan si buuxdo kuugu baarno kaalmooyinka. Naga soo wac keliya si bilaash ah 0808 808 3555 waxaana kaala talinaynaa waxa aad soo coodsanaysid. Adeegyadeena waa lacag la'aan in kastoo oo aan ka madaxbanaan nahay xukuumadda, adeeggeenana waa mid kalsooni leh. Waxuu sidaan micnaheedu yahay inaan u sheegayn qofna inaad na soo wacday mana loo baahno inaad nasiidid magacaada haddii aadan doonayn.

Waxay warqaddaan si aad ah kuugu micnaynaysaa waxa ku saabsan Gunnada Canshuurta, oo ah sida ugu wayn ee lagu kaalmeeyo qooysaska ku haysto carruur UK, haddii ay waaliddiintooda shaqeeyaan ama aysan shaqayn. Haddii aad u malaynaysid inaad qabatid shaqo lacagteedu yar tahay, waxaa buuxinaayo mushaharkaada Gunnada Canshuurta, sidaas darted waxaad yeelanaysaa wax kugu filan oo aad ku noolaatid.

Haddii aad doonaysid inaad sii ogaatid caawinaadda aad heli kartid haddii aad qabatid shaqo gaar ah, ama waxaad heli kartid haddii aadan shaqayn, ama haddii ay jirto wax aad ka fahmin warqaddaan, fadlan inoo soo wac si aan kuu siino talo dheeri ah. Waan ku farxi doonna in aan ku caawino.

Waa maxaay Gunnada Canshuurta?

Waxaa jiraan labo ah Gunnada Canshuurta ee lagu siiyo qooysaska kaalmo maaliyadeed. Waxaa soo coodsan karo **Gunnada Canshuurta Shaqada** qof kasto oo mas'uul ka ah carruur oona shaqeeyo ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii. Shaqaale kale oo qabin carruur xitaa way soo codsan karaan. Waxay qooysaska leh carruur soo coodsan karaan **Gunnada Canshuurta Carruurta** iyada oo la fiirin inaad shaqaysid ama aadan shaqayn.

Waxaa gunnadaan maamulo Qaybta Canshuuraha ee Boqoradda (ee loo isticmaali doonno ereyga Revenue) waxayna ku xiran yahiin xaaladahaada waana suurto gal inaad u qalantid midkood ama labaduba. Waxaa Qaybta Canshuuraha loo oggolaaday inay caawiyaan dad aad uga badan sidii hore ee lagu qiyaasay 9kii qofba 10 qooys oo ah kuwo u qalmaan qaar ka mid ah Gunnada Canshuurta.

Haddii aad iskaaga u shaqeysato waa inaad akhrisataa warqadda "a tax credits guide for self-employed parents" oo si bilaash ah laga heli karo khadkeena.

Gunnada Canshuurta iyo Kaalmada Dakhliga

Waxay Gunnada Canshuurta mar hore beddeshay wax bixinta kala duwan oo ah sida wax ugu deridda carruurta oo horay u ahaan jirtay sida qayb ka mid ah kaalmooyinka ah sida Gunnada xanaanada carruurta.

Waxay xitaa xukuumadda damacsan tahay inay ku beddesho Gunnada Canshuurta carruurta dhammaan kaalmada dakhliga (IS) iyo Gunnada Shaqo-doonka ee ku salaysan dakhliga (ibJSA). Codsiyada cusub ee (IS/ibJSA) waxaa ku jiro oo keliya xisaabaha codsadaha iyo lamaanahiisa, oo gaar ka ahaa codsiga Gunnada Canshuurta ee Carruurta oo ay u baahan yahiin carruur kasto. Qooysaska horay u qaadan jireen IS/ibJSA, waxay bilaawga u lahaayeen doorashada ah inay xisaabaha carruurta lagu daro abaalmarinta. Haseyeeshee, xilliga 2008 waxay qooysaska si otomaatik ah ugu gudbaayaan Gunnada Canshuurta Carruurta. Markaa xisaabaha dadka weyn ee IS/ibJSA ayaa la siinayaa, iyadoo ay la socoto Gunnada Canshuurta Carruurta oo la siiyo carruurta. Inta badan waxay waaliddiinta si wadaayaan inay qaataan IS/ibJSA iyada oo wax laga dhimay. Si kastaba ha noqotee waxay arki doonaan inaysan qaadanayn IS/ibJSA mar haddii xisaabta carruurta laga saaro.

Waxay xukuumadda rajaynaysaa in, bacdamaa loo gudbaayo Gunnada Canshuurta Carruurta, inay waaliddiinta qaata IS/ibJSA ay wadartooda dakhliga ka ficnaan doonto sidii horey ama inaysan arkayn wax isbeddel ah lacagta soo gasha tododdaadki. Si kastaba ha noqotee tiro aad u yar ayaa aad wax u waynaayo. Waxaan soo saarney hagid yar ee Gunnada Canshuurta Carruurta iyo Gargaarka Dakhliga oo laga heli karo si bilaash ah khadkayna caawinaadda.

Yaa ku jiro codsigayga?

Waxay lamaanayaasha is-qabo si wadajir ah u soo samaynayaan codsiga. Kani waxaa ka mid ah lamaane isku jinsi ah. Waxaad kale u soo codsan kartaan cunugga sida caadiga ah idiin la nool, ilaa Sebtembar ka dib maalinta dhalashadiis ee 16 jirka ah ama ilaa 19 jir haddii ay si buuxda wax u bartaan oo aysan ahayn wax barashada horusocodka ah ama noocyo ka mid ah tababarka shaqaada lacag la'aanta ah. Kani waaxaa loo dheerayn karaa ilaa u qofka dhallinyarada ka gaaro 20 jir, laakin waa inay dhameeyaan waxbarashadooda ama tababarkooda ay bilaaben ama loo oggolaadey inay dhigtaan ka hor inta aysan gaarin 19 jir.

Haddii uu qofka dhallinyarada bilaabo inuu codsado kaalmooyinka (sida kaalmada dakhliga, gunnada Shaqo-doonayaasha ee ku salaysan kaalmada dakhliga ama Kaalmada Jirrada) oo iskood xaq ugu lee-yahiin waxay micnaheedu noqonaysaa inaad helayn canshuurtooda gunnada. Kala soo xiriir Khadka caawinaadda waxii talosiin ah ee ku saabsan arrintaan.

Ma soo codsan karaa Gunnada Canshuurta Shaqada?

Si loo soo codsado Gunnada Canshuurta Shaqada waa inaad jirtaa:

- 16 sano jir ama ka wayn tahay; **iyo**
- Ku nooshahay UK oo aadan hoos imaanayn xakamaynta soo gelitaanka (haddii waxyaabo qaarkood laga reebo); **iyo**
- Inaad shaqaynaysid ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii mas'uulna ka tahay laba carruur ama ka badan.

Fadlan ogow qaar ka mid ah shaqaale kale oo carruur qabin (tusaale ahaan shaqaalaha curyaanka ah) soo coodsan karaan Gunnada Canshuurta Shaqada. Haddii aadan xanaanaynayn cunug waa inaad waydiisataa talosiin Xafiiska Talosiinta Muwaadanka (Citizens Advice Bureau-CAB-) ama adeegga xuquuqda barwaaqaynta.

Qiimaynta ah inaad shaqaysid iyo in kale ilaa 16 saacadood toddobaadkii, Xafiiska Canshuurta (Revenue) waxuu xisaabinayaa saacadaha oo aad caadi ahaan shaqaysid, iyaga oo tixgelinayn lacagta aan la bixin berirfta quraacda. Tusaale ahaan, haddii aad si joogto ah u shaqaynaysid waqtiga kor socodka waxaa lagu darayaa saacadahaasi dheeriga ah.

Waxaa kale oo jiraan nidaamyo gaar u ah inay raacaan dadka ku sifoobay inay shaqaynayeen laakin haatan uga istaagay si ku meel gaar ah, ku jira shaqaalaha dugsiga ee xilliga dugsiga xiran yahay, dumarka la siiyo Lacagta Hooyanimada ama Gunnada Hooyanimada, dadka ku jiro Xaaladda Ilmo-korinta ama lacagta Aabbanimada, iyo dadka qaarkood uga maqan shaqada jirro (taasi oo aan ka badnayn 28 toddobaad).

Caawinaad dheraad ah ee ka imaado Gunnada Canshuurta Shaqada sida loo baxsho kharashka xanaanaynta carruurta

Haddii aad ku bixisid lacag xanaanaynta carruurta markii aad shaqaysid, waxaa codsigaada ku jiri karo caawinaadda ' in loo qalmo qiimaha lagu bixiyo xanaanaynta carruurta'. Si loo tixgeliyo qiimaha xanaanayntaada carruurta waa inaad ahaataa:

- Waalid keligii ah oo shaqeeyo ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii; ama
- Lamaanayaal is-qabo oo labaduba shaqeeyaan 16 saacadood ama ka badan toddobaadkii; ama
- Lamaanayaal is-qabo oo hal ka mid ah uu shaqeeyo 16 saacadood ama ka badan toddobaadkii midka kalena uu qaato qaar ah kaalmooyinka curyaanimada/jirada (ama ay ku jiraan isbitaal ama xabsi).

Noocee qiimaha xanaanaynta ayaa la tixgeliyaa?

Waxaa la tixgeliyaa xanaanada carruurta ee diiwaan gashan ama la soo oggolaaday. Waxaa ku jiro dadka xanaaneeyo carruurta, halka lagu xanaaneeyo carruurta iyo nidaamyada kale ay qabtaan bixiyayaasha la oggolaaday. Xanaanada lagu siiyo cunugga gurigiisa waa la tixgelin karaa haddii qofka siinaayo oo diiwaan gashan yahay. Xanaanaynta carruurta oo uu ku siiyo cunugga guriga qof qaraabo ah ma la tixgelinaayo- sidaan ayayna ahaanaysaa arrinta xitaa haddii qofka qaraabada ah uu yahay carruur-xanaaneeye la soo oggolaaday. Ma heli kartid caawinaadda xanaanaynta carruurta oo ku siiyo qof qaraabo ah laguna saameeyo, guriga qaraabaha, haddii aysan carruur kale halkaas ku xanaanayaan mooyee.

Haddii cunugga lagu qaato Gunnada Haynta Curyaanka (DLA) ama u diiwaan gashan yahay qiimaha xanaanada carruurta indhaha la' waxaa lagu deri karaa ilaa Sebtembar ka dib maalintiisa

dhalashada oo uu gaaray 16 jir, haddii ay sidaasi ahayn qiimaha ku baxo xanaanada carruurta waxaa lagu deri karaa oo keliya ilaa Sebtembar ka dib markii ay gaaraan maalinta dhalashada 15 jir. Xisaabta ugu sarayso ee xanaanada carruurta ee la tixgelin karo waa £175 toddobaadkii 1 cunug, iyo £300 toddobaadkii 2 carruur ama ka badan. 80% oo ah qiimaha ku baxo xanaanada carruurta ayaa la bixin karaa. Waxay sidaan micnaheedu tahay in inta ugu badan xaqiiqdii ee lagu deri karo xanaanada qiimaha lagu bixiyo xanaanada carruurta inay tahay £140 toddobaadkii (80% ee £175) 1 cunug iyo £ 240 toddobaadkii (80% ee £300) 2 carruur ama ka badan. Waxaan soo saarnaa xaashida xaqiiqadda ee “Helidda iyo bixinta xannaanada cunugga”. Waxaa looga heli karaa si bilaash ah Khadka caawinaadda waxaana lagu bixinayaa warar aad u faahfaahsan ee ku saabsan foomamka mudnaanta xanaanada carruurta.

Ma soo codsan karaa Gunnada Canshuurta Carruurta?

Si loo soo coodsado Gunnada Canshuurta carruurta waa inaad ahaatid:

- 16 jir ama ka wayn tahay; **iyo**
- Qof ku nool UK iyo aan hoos imaan xakamaynta soo gelootida iyo xaq u leh deggenaanshaha UK; **iyo**
- Ka tahay mas’uul hal ama carrur ka badan ee ku hoos yimaadaan.

Waxaa la soo coodsan karaa Gunnada Canshuurta Carruurta iyada oo loo eegin inaad shaqaysid ama aadan shaqayn waxaana lagu bixiyaa iyada oo lagu daraayo Kaalmada carruurta la siiyo. Waxaa sare loogu qaadi karaa xisaabta Gunnada Canshuurta carruurta oo aad qaadatid haddii aad lee-dahay cunug lagu bixiyo Gunnada Haynta Curyaanka (DLA) ama cunug indhoole ahaan ku diiwangashan. Waxay sidaan sabab u tahay xisaabta dheeriga ah ee loo yaqaan ‘quudka curyanimada’ oo lagu daro xisaabinta canshuurtaada gunnada ee cunug kasto oo qaato DLA ama ku diwaan gashan inuu yahay indhoole. Haddii cunuggaada qaato tirada ugu sarayso DLA oo qayb ka ah xanaanada waxaa lagu sii darayaa ‘quudka curyaanimada daran’. Waxay Gunnada Canshuurta Carruurta noqon kartaa in iskeed loo bixiyo ama lala bixiyo Gunnada Canshuurta Shaqada.

Sidee loo bixiyaa Gunnada Canshuurta?

Waxaa la siiyaa Gunnada Canshuurta shaqada (haddii laga reebo quud kasto ee xanaanada carruurta) waalidka shaqeeyo. Waxay dadka iskood u shaqaysto waxaa si toos ah u siiyo Xafiiska canshuuraha.

Waxaa la siiyaa qiimaha Gunnada Canshuurta carruurta iyo wax kasto oo ah Gunnada Canshuurta Shaqada xanaaneeyaha, inta badan iyada oo lagu shubaayo xisaabta uu ku lee-yahay bankiga. Waxaad dooran kartaa in laguu siiyo si toddobaadle ah ama 4tii toddobaadba.

Waxaa la tixgeliyo markii la xisaabinaayo abaalmarinta gunnada canshuurtayda?

Waxay tirada Gunnada Canshuurta oo aad qaadatid ku xiran tahay xaaladda shakhsiyadeed ee qooyskaada iyo dakhli sanadeedkaada.

Xaaladaha shakhsiyadeed ee la tixgelinaayo waxay yahiin:

Gunnada Canshuurta Shaqada

- Inaad tahay ama aadan ahayn waalid keligii ah ama xubin ka ah lamaanayaal is-qabo;
- Inaad shaqaysid iyo in kale 30 saacadood ama ka badan toddobaadkii (waxaaa surto gal ah inaad isku dartaan sacadaha shaqada aad adiga iyo lamaanahaada shaqaysaan);

- Inaad tahay iyo in kale curyaan;
- Inaad adiga ama lamaanahaada qaadataan tiro sare ee ah xanaanada qaybta DLA;
- Inaad u qalantid iyo in kale qiimaha xanaanada cunugga;
- Inaad 50 jir tahay ama aad ka wayn tahay iyo in kale oo dhowaan qaadanaysay qaar ka mid ah kaalmooyinka.

Gunnada Canshuurta Carruurta

- Tirada carruurta ee ku hoos timaado;
- Inaad haysatid iyo in kale cunug ay da'diisu ka hoosaydo hal sano;
- Tirada carruurta ay u qaataan tiro kasto ee DLA ama ku diiwaan gashan indho la'aan;
- Tirada carruurta ay u qaataan tirada sareysa ee xanaanada qaybta DLA.

Xisaabinta dakhligaaga

Waxuu xaqqaada Gunnada Canshuurta ku xiran yahay xitaa canshur sanadeedka dakhligaada. In kasto oo Gunnada Canshuurta ay tahay mid ku salaysan dakhliga waa inaadan u qaadan inaad lee-dahay lacag aad u badan oo kugu ah munaasab. Waxaa laguu ballanqaadayaa xoogaa ah Gunnada Canshuurta carruurta ila inta uu dkhligaada ka yar yahay £58,000 (£66,000 haddii aad haysatid dhallaan ka yar 1sano). Markay jiraan xaalado qaarkood (tusaale, Waxaad haysaa carruur ka badan hal oo qaataan DLA waxaana u qalantaa inaad heshid qiimaha xanaanada carruurta) waxaad heli kartaa qaar ka mid ah Gunnada Canshuurta xitaa haddii uu dakhligaada ka sareeyo tirooyinkaan. Haddii aad ka tahay xubin lamaanayaasha is-qabo markaa waxaa la xisaabayaa dakhliga lamaanahaada. Dakhliga cunugga idin hoos yimaado had iyo jeer si buuxdo looma tixgelinaayo.

Waxaa lagu qiimeeyaa abaalmarinta Gunnada Canshuurta dakhliga canshuurta sanadka la soo dhaafay. Si kastaba ha noqotee haddii dakhligaada sanadka lagu jiro oo u muuqdo inuu ka yar yahay kii sanadkii la soo dhaafay, waxaa markaa la isticmaalayaa qiimaynta dakhligaada haatan jiro. Haddii dakhligaada sanadka lagu jiro oo u muuqdo inuu kor dhaafaayo dakhligaada sanadkii laga soo gudbay £25,000, markaa waxaa la isticmaalayaa qiimaynta dakhliga sanadka oo laga jaraayo £25,000.

Xitaa haddii aad u malaynaysid inuu dakhligaada aad u sarreeyo si aad u heshid Gunnada Canshuurta waxaa fiican inaad soo samaysid codsi. Waxay sidaan difaacaysaa xaqqaada ah in taariikh dib looga soo bilaabo Gunnada Canshuurta haddii ay dhacdo in si lama filaan u dhaco dakhligaada.

Maxa laga tixgelinayaa dakhliga?

Wadarta guud ee dakhli sanadeedka ee ka horeeyo canshuurta waa la xisaabayaa. Sida uu yahay nidaamka guud waxaa la tixgelinayaa dakhliga la canshuuri karo. Waxaa sidaan ku jiro:

- Wadarta guud oo ah waxa ku soo galo;
- Canshuurta laga qaado faa'iidooyinka iskaa u shaqaysiga;
- Qaar ka mid ah kaalmooyinka bulshada ay ku jiraan **Gunnada xanaaneeyayaasha** (ka eeg hoos kuwaa aan la xisaabayn);
- Dakhliga soo baxo hantida (guryaha);
- Dakhliga ka soo baxo raasumaalka;
- Hawlgabka (dowladda, gaarka iyo shaqada);
- Dakhliga kale ee la canshuuri karo.

Dakhligee ayaa la tixgelinayn?

Waxaa gabi ahaanba loo tixgelinayn qaar ka mid ah ujeeddooyinka dakhliga Gunnada Canshuurta. Waxaa ka mid ah:

- Lacagta lagu bixiyo Gacan ku haynta;
- Inta badan noocyada dakhliga ardayda;
- Lacagta lagu bixiyo Carruurta aadan dhalin/aad haysid (laakin ma ku jiro abaalmarinta quud kasto);
- Gunnada Haynta Curyaanka;
- Gunnada La joogista;
- Kaalmada Carruurta;
- Gunnada Ilaaliyaha;
- Kaalmada Dakhliga;
- Dakhliga ku salaysan Gunnada Shaqo-doonka;
- Lacagta Tacsida;
- Gunnada Hooyanimada;
- £100 ee ugu horeeyo toddobaadka Xaaladda Hooyanimada, Xaaladda Hooyinimo ama Bixinta lacagta Ilmaha aadan dhalin;
- Gunnada Curyaanimada aad u Xun;
- Kaalmada Jirada waqtiga gaaban;
- Waqtiga kala guurka ee Kaalmada Jirada waqtiga dheer (tusaale, ee qaadanaayay ilaa ka hor 13.04.95);
- Kaalmada Dhaawaca Shaqada.

Sidaa ma ku dhammaanaayo liiskaan – waxaa la tixgelin noocyo kale oo dakhli ah.

Maxaa dhici karo haddii aan lee-yahay raasumaal badan ama kayd?

Ma jiro raasumaal kaa reebaayo inaad soo coodsatid Gunnada Canshuurta. Beddelkiisa dakhli kasto ee la canshuuri karo oo aad ka heshid raasumaalkaada, tusaale ahaan, kor so socodka kaydkaada (aan ka ahayn kaydka ka madaxbanaan canshuurta sida ISA).

Imisaa Gunnada Canshuurta aan helayaa?

Waxuu xafiiska Canshuurta isticmaalayaa xaaladaha qooyskaada si wax uga qabto 'xaqqada canshuurta ugu sarayso ee gunnada'. Haddii aad heshid Kaalmada Dakhliga ama JSA ee ku salysan dakhliga ama Gunnada Hawlgabnimada waxaad si automaatik ah xaq u lee-dahay Gunnada Canshuurta Carruurta ee ugu sarayso. Haddii kale waxaad u baahanaaysaa inaad barbar dhigtid dakhli sanadeedkaada canshurmaayo bar-biloowga . Waa **£15,575**haddii aad xaq u lee-dahay keliya Gunnada Canshuurta carruurta iyo **£6,420** haddii xitaa xaq u lee-dahay Gunnada Canshuurta Shaqada (Haddii adiga ama lamaanahaaga shaqeydaan 16 saacadood toddobaadki ama ka badan).

Haddii dakhligaada yahay ama ka hooseeyo bar-biloowga waxaad ku helaysaa Gunnada Canshuurta ugu sarayso. Haddii dakhli sanadeedkaada uu ka sareeyo kan bir-biloowga abaalmarinta waa la dhimayaa – dakhli kasto oo ah £1 oo aad haysatid kana sareeyo bir-biloowga, xaqqaada Gunnada Canshuurta sare waxaa laga dhimayaa 39p. Si kastaba ha noqotee, waxaa xaq u yeelanaysaa ugu yaraan £545 sanadkii bacdamaa dakhli sanadeedkaada la canshuuri karo uu ka yar yahay £50,000. Lacag-bixintaan waxaa loo yaqaanaa quudinta qooyska ee Gunnada Canshuurta carruurta. Haddii dakhligaada kor u dhaafaayo £50,000 sanadkii, quudka qooyska waxaa loo dhimayaa si tartiib-tartiib ah.

Isticmaalidda Naqshadaha

Waxaa bogagga soo socdaan ku jiraan tiro naqshado ah ee horay loo soo diyaariyay si ay kaaga caawiyaan qiimaynta tirada Gunnada Canshuurta oo aad heli kartid. In kasto sida caadiga ah loo xisaabiyo Gunnada Canshuurta sida abaalmarinta sanadka, waxay naqshadaha muujinayaan waxa ay u dhimaan toddobaadkii. Waxaa dhammaan xisaabaha layskugu keenay ilaa pound-ka ugu dhow. Xasuuso in abaalmarintaada u ku xiran yahay dakhligaaga sanadka la soo dhaafey.

Haddii midkiinaba adiga iyo lamaanahaada uusan shaqaynayn ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii isticmaal Naqshadda 1 – waxay lee-yahiin sadaro kala go'go'an ee ku xiran tirada carruurta aad haysatid iyo inta curyaamiin ka ah. Waxaa cunugga loo aqoonsanayaa inuu yahay curyaan haddii uu ku diiwaan gashan yahay indhoole ama uu qaato Gunnada Haynta Curyaamiinta ee xisaab kasto. Isticmaal sadarka ku habboon si aad u heshid fikrad inta ay la ekaan karto canshurta gunnada qooyska ku jiro xaaladahaada (xasuuso in loo isticmaalayo si toddobaad ah xisaabta).

Haddii uu midkiinaba adiga ama lamaanahaada shaqeeyo ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii, naqshadda ah inaad u soo celis waxay ku xiran tahay tirada carruurta qooyskaada iyo inta ka ah curyaamiin. Waxaa cunugga loo aqoonsan yahay curyaan haddii uu ku diiwaan gashan yahay indhoole ama uu qaato Gunnada Haynta Curyaanimada.

- Haddii aad haysatid 1 cunug uu cunuggaasna yahay curyaan isticmaal Naqshadda 2;
- Haddii aad haysatid 2 carruur, 1 uu yahay curyaan isticmaal Naqshadda 3;
- Haddii aad haysatid 2 carruur, ayna labaduba yahiin curyaamiin isticmaal Naqshadda 4;
- Haddii aad haysatid 3 carruur, 1 uu yahay curyaan isticmaal Naqshadda 5;
- Haddii aad haysatid 3 carruur, 2 ay yahiin curyaamiin isticmaal Naqshadda 6.

Maxaa dhici karo haddii aad lacag ku bixisid xanaanaynta carruurta?

Xisaabta Gunnada Canshuurta oo aad qaadatid waa ka sarayn kartaa haddii aad ku bixisid xanaanaynta carruurta ee habboon. Naqshadaha 2-6 waxay lee-yahiin sadaro dheeri ah oo muujinayaan abaalmarinta Gunnada Canshuurta ay waaliddiinta heli karaan halka ay ka siiyaan xisaabaha ugu badan xanaananada carruurta ee u qalanta. Ka fiiri qaybta horey 'Caawinaadda dheraadka ah ee kharashka Gunnada Cunugga' taasoo si faah-faahsan ugu qoran tahay markii qiimaha ku baxo xannaanada cunugga la tixgelinaayo. Ma aha suurto gal caawinaadda qiimaha xanaanada carruurta haddii aad xaq u lee-dahay keliya Gunnada Canshuurta Carruurta.

Naqshadda 1
Xaqqa Gunnada Canshuurta carruurta oo keliya

Wadarta guud ee canshuur dakhliga ee sanadeedka	Qooyska leh 1 cunug. Cunuggiisana yahay curyaan (£) toddobaadkii	Qooyska leh 2 carruur. 1 uu yahay curyaan (£) toddobaadkii	Qooyska leh 2 carruur. Labaduna ay yahiin curyaan (£) toddobaadkii	Qooyska leh 3 carruur. 1 uu yahay curyaan (£) toddobaadkii	Qooyska leh 3 carruur. 2 ay yahiin curyaan (£) toddobaadkii
£15,575 iyo ka yar	99	139	188	179	228
£20,000	66	106	155	146	195
£25,000	29	69	117	108	157
£30,000	10	31	80	71	120
£35,000	10	10	42	33	82
£40,000	10	10	10	10	45
£45,000 – £50,000	10	10	10	10	10
£55,000	4	4	4	4	4

Haddii aad lee-dahay dhallaan ay da'diisu ka yar tahay hal sano, waxaad xaq u yeelan kartaa lacag-bixin aad u sarayso.

Haddii aad lee-dahay cunug qaato tiro sare oo ah xanaanaynta lagu helo DLA, waxaad xaq u yeelan kartaa lacag-bixin aad u sarayso.

Naqshadda 2
Qooyska shaqeeyo oo leh 1 cunug, oo cunuggana yahay curyaan.

Wadarta guud ee canshuura dakhliga ee sanadeed-ka	Xaq la'aanta qiimaha xanaanaynta carruurta (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro qiimaha ugu sareeyo ee Xanaanada carruurta (£) toddobaadkii
£6,420 ama ka yar	168	308
£10,000	155	295
£15,000	118	258
£20,000	80	220
£25,000	42	182
£30,000	10	145
£35,000	10	107
£40,000	10	70
£45,000	10	32
£50,000	10	10
£55,000	4	4

Waxay naqshaddaan qabtaa in qooysaska leh dakhliga £10,000 iyo waxii ka sareeyo inay shaqeeyaan 30 saacadood toddobaadkii ama ka badan.

Waxaa la siin karaa lacag-bixin aad u sarayso qooysaska leh qof oo shaqaale ah curyaan-na ah, ama dhallaan ka yar hal sano ama xubin qoys oo qaato sicirka sare ee xanaanada qaybta DLA, ama qof da'diisu ka sarayso 50 jir ama ka wayn oo u laabanaayo shaqada ka dib markii uu qaadanaayay qaar ka mid ah kaalmada.

Naqshadda 3

Qooyska shaqeeyo oo leh 2 carruur, hal ka mid ah yahay curyaan.

Wadarta guud ee canshuurta dakhliga sanadeedka	Xaq la'aanta qiimaha xanaanaynta carruurta (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada cauurta ugu sarayso ee cunugga (£) toddobaadkii	Waxaa ku jirto xanaanada carruurta ugu sarayso ee 2 ama ka badan oo ah carruur (£) toddobaadkii
£6,420 ama ka yar	209	349	449
£10,000	195	335	435
£15,000	157	297	397
£20,000	120	260	360
£25,000	83	223	323
£30,000	45	185	285
£35,000	10	147	247
£40,000	10	110	210
£45,000	10	72	172
£50,000	10	35	135
£55,000	4	4	97

Waxay naqshaddaan qabtaa in qooysaska leh dakhliga ah £10,000 iyo waxii ka sareeyo ay shaqeeyaan 30 saacadood toddobaadkii ama ka badan.

Waxaa la siin karaa lacag-bixin aad u sarayso qooysaska leh qof oo shaqaale ah curyaan-na ah, ama dhallaan ka yar hal sano ama xubin qoys oo qaato sicirka sare ee xanaanada qaybta DLA, ama qof da'diisu ka sarayso 50 jir ama ka wayn oo u laabanaayo shaqada ka dib markii uu qaadanaayay qaar ka mid ah kaalmada.

Naqshadda 4
Qooyska shaqeeyo oo leh 2 carruur, labaduna yahiin curyaamiin.

Wadarta guud ee canshuurta dakhliga sanadeedka	Xaq la'aanta qiimaha xanaanaynta carruurta (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada carruurta ee ugu sarayso ee 1 cunug (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada carruurta ee ugu sarayso ee 2 ama carruur ka badan (£) toddobaadkii
£6,420 ama ka yar	257	397	497
£10,000	244	384	484
£15,000	206	346	446
£20,000	169	309	409
£25,000	131	271	371
£30,000	94	234	334
£35,000	56	196	296
£40,000	19	159	259
£45,000	10	121	221
£50,000	10	84	184
£55,000	4	46	146

Waxay naqshaddaan qabtaa in qooysaska leh dakhliga ah £10,000 iyo waxii ka sareeyo ay shaqeeyaan 30 saacadood toddobaadkii ama ka badan.

Waxaa la siin karaa lacag-bixin aad u sarayso qooysaska leh qof oo shaqaale ah curyaan-na ah, ama dhallaan ka yar hal sano ama xubin qoys oo qaato sicirka sare ee xanaanada qaybta DLA, ama qof da'diisu ka sarayso 50 jir ama ka wayn oo u laabanaayo shaqada ka dib markii uu qaadanaayay qaar ka mid ah kaalmada.

Naqshadda 5

Qooyska shaqeeyo oo leh 3 carruur, hal ka mid ah u yahay curyaan.

Wadarta guud ee canshuur sanadeedka dakhliga	Xaq la'aanta qiimaha xanaanaynta carruurta (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada ugu sarayso ee 1 cunug (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada carruurta ugu sarayso ee 2 ama ka badan oo ah carruur (£) toddobaadkii
£6,420 ama ka yar	248	388	488
£10,000	235	375	475
£15,000	197	337	437
£20,000	160	308	400
£25,000	123	263	363
£30,000	85	225	325
£35,000	48	188	288
£40,000	10	150	250
£45,000	10	113	213
£50,000	10	75	175
£55,000	4	38	138

Waxay naqshaddaan qabtaa in qooysaska leh dakhliga ah £10,000 iyo waxii ka sareeyo ay shaqeeyaan 30 saacadood toddobaadkii ama ka badan.

Waxaa la siin karaa lacag-bixin aad u sarayso qooysaska leh qof oo shaqaale ah curyaan-na ah, ama dhallaan ka yar hal sano ama xubin qoys oo qaato sicirka sare ee xanaanada qaybta DLA, ama qof da'diisu ka sarayso 50 jir ama ka wayn oo u laabanaayo shaqada ka dib markii uu qaadanaayay qaar ka mid ah kaalmada.

Naqshadda 6

Qooyska shaqeeyo ool eh 3 carruur, laba ka mid ah ay yihiin curyaan.

Wadarta guud ee canshuurta dakhli sanadeedka	Xaq la'aanta qiimaha xanaanaynta carruurta (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada carruurta ee 1 cunug (£) toddobaadkii	Waxaa ku jiro xanaanada carruurta ee 2 ama ka badan oo carruur ah (£) toddobaadkii
£6,420 ama ka yar	297	437	537
£10,000	284	424	524
£15,000	246	386	486
£20,000	209	349	449
£25,000	171	311	411
£30,000	134	274	374
£35,000	97	237	337
£40,000	59	199	299
£45,000	21	161	261
£50,000	10	124	224
£55,000	4	76	186

Waxay naqshaddaan qabtaa in qooysaska leh dakhliga ah £10,000 iyo waxii ka sareeyo ay shaqeeyaan 30 saacadood toddobaadkii ama ka badan.

Waxaa la siin karaa lacag-bixin aad u sarayso qooysaska leh qof oo shaqaale ah curyaan-na ah, ama dhallaan ka yar hal sano ama xubin qoys oo qaato sicirka sare ee xanaanada qaybta DLA, ama qof da'diisu ka sarayso 50 jir ama ka wayn oo u laabanaayo shaqada ka dib markii uu qaadanaayay qaar ka mid ah kaalmada.

Sidee ayaan u soo codsadaa Gunnada Canshuurta?

Waxaa maamulo Gunnada Canshuurta Carruurta iyo Gunnada Canshuurta Shaqada Xafiiska Qaybta Canshuuraha ee Boqoradda (Revenue) labaduna waxaa lagu soo coodsadaa foomka TC600. Waxaa laga heli karaa Xafiiska deegaanka ee Canshurta ama iyada la soo wacaayo Khadka caawinaadda Gunnada Canshuurta oo ah 0845 300 3900 (Telefoonka qoraalka 0845 300 3909). Codsiyada waxaa caadi ahaan lagu soo samaysan karaa iyada oo la isticmaalaayo Shabakadda Qaybta Canshuuraha, laakin adeeggaaan waa la joojiyay xilliga warqaddaan la soo qorey. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad soo bixisid faahfaahinadaada ee dakhligaada la canshuuri karo ee canshuur sanadeedkii la soo dhaafay. Waxaa wararkaan laga heli karaa P60-gaada, warqadda mushaharkaada ee shaqada ama warbixin sanadeedka kaalmada la canshuuro ee Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka.

Dib u celinta codsiga gunnada canshuurta
Codsiyada waxaa loogu celin karaa dib ilaa 3 bilood. Waqtigii la qoraayay, foomka codsiga ma uusan lahayn qaybta kugu casumayday inaad soo coodsatid dib ugu celinta taariikheed. Haddii aad doonaysid waa inaad ama ku soo lifaaqdaa coodsi qoran ee aad ku doonaysid baakadka codsiga ama u soo dirtaa telefoon xafiiska Gunnada Canshuurta ee qaabilsan arrintaan.

Go'aan helidda codsigaaga
Mar haddii uu xafiiska canshuuraha soo socodsiiyay codsigaada waxaa laguu soo dirayaa la socodsiinta go'aankooda. Ma kuu soo kala qeexayo keliya inta ay tahay xisaabta Gunnada Canshuurta oo aad qaadanaysid laakin xitaa waxaa laguu soo kala qeexayaa xaaladaha qooyskaada oo ay ku salaysan tahay abaalmarinta (tusaale ahaan, canshuur sanadeedka dakhligaada, tirada guud ee carruurta ku hoos timaado, tirada looga aqoonsan yahay carruurta curyaanka ah). Waa muhiim inaad eegtid wararka si aad u hubisid inuu sax yahay. Haddii uusan sax ahayn markaa waxay keeni kartaa in wax yar laga bixiyo ama wax badan laga bixiyo Gunnada Canshuurta.

Dhammaadka sanadka canshuurta

Mar haddii lagugu abaalmariyo, waxay abaalmarinta Gunnada Canshuurta dhammaanaysaa dhammaadka canshuurta sanadka. Waxuu markaa Xafiiska Canshuurta qabanayaa dib u eegid sanadeedka. Waxay kuu soo dirayaan baakadka dib u eegidda oo kuu kala qayaxayo faahfaahinada shakhsiga ah ee la isticmaalay si loo xisaabiyo abaalmarintaada haatan jirto, oo ah inaad iska fiirisid inuu sax yahay. Waxaa lagu soo waydiisanayaa inaad soo xaqiijisid ama wax ka soo beddeshid wararkaan iyo xitaa inaad soo xaqiijisid canshuurta sanadeedka dakhligaada ee sanadka dhammaaday.

Qooysaska helo oo keliya qaybta aasaasiga ee Gunnada Canshuurta Carruurta uma baahan doono inay soo buuxiyaan foomka macluumaadka xaaladdooda. Haddii faah-faahintaada aysan is beddelin, dakhligaagana ka mid yahay kuwa lagu soo qorey baakadda dib-u-eegidda, abaalmarinta qaybta qooyska waxaa loo bixinaayaa sii otomatik ah. Baakaddaadda soo cusbonaysiinta ayaa kuu xaqiijin doono haddii aad u qalmatid. Haseyeeshe haddii ay jiraan wax isbeddel ah ee xaaladdaada waa inaad soo ogaysiidaa Xafiiska Gunnada Canshuurta. Qooysaska kale waa inay soo dhamystiraan foomka macluumaadka xaaladdooda.

Mar haddii xafiiska Canshuurta helo xaqiijinta faah-faahinadaada waxay u isticmaalayaan wararkaan inay iskaga caawiyaan xisaabinta abaalmarinta Gunnada Canshuurtaada ee sanadka cusub. Waxay kale ee u isticmaalayaan faahfaahinadaan inay fiiriyaan inaad heshay iyo in kale xisaabta saxda ah ee Gunnada Canshuurta ee sanadka la soo dhaafay. Haddii wax yar laga bixiyay Gunnada Canshuurta waa inaad heshaa wadar xisaab ah ee wada socoto oo ah waxi dib u dhacay. Haddii wax badan laga bixiyay Gunnada Canshuurta, waxuu xafiiska Canshuurta ku soo waydiisan karaa inaad soo celisid bixintii saa'idka ahayd- inta badan, waxaa laga dhimaa abaalmarintaada ee

sanadka cusub (fiiri qaybta hoose ee madaxa ugu qoran ‘Waxa dhacaayo haddii bixin dheeraad ah ee Gunnada Canshuurta la i siiyo’).

Waxay ku qaadan kartaa dhowr bilood sidii u xafiiska Canshuurta u helo faah-faahintaada iyo kuu xisaabiyo abaalmarintaada. Bilaha ugu horreyo ee sanadka canshuurta cusub waxay ku siin doonaan ‘bixita ku meel gaar ah’ ayadoo ku salaysan dakhliga iyo xaaladda aad sanadka la soo dhaafey soo sheegtay.

Isbeddelada xaaladaha inta lagu jiro canshuur sanadeedka

In kasta oo abaalmarinta Gunnada Canshuurta ay socoto ilaa dhammaadka sanad canshuureedka waxaa la saxi karaa inta lagu jiro sanadka haddii uu jiro isbeddel ku saabsan xalaadaha.

Waaa in lagu soo wargeliyaa isbeddelada qaarkood Xafiiska Canshuuraha 3 bilood gudahood ama waxaa la kulmaysaa ganaax dhan £300. Waqtiga xaadirka ah kuwaani waxay yahiin:

- isbeddelka tirada dadka qaangaarka ah ee soo codsanaayo (tusaale, in laga tago lamaanayaal is-qabo oo la noqdo waalid keligii ah ama si ka soo horjeedo);
- dhimis ku timaado qiimaha xanaanada carruurta lagu bixiyo oo dhan £10 ama ka badan ugu yaraan 4 toddobaad oo is-dabo jog ah; ama haddii aad u baxdid dibedda in ka badan 8 toddobaad (12 toddobaad haddii aad ugu baxdid dibedda jiro aawgeed ama tacsi);
- aad joojiso inaad shaqeyso ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii;
- saacadaha aad shaqeyso ay hoos ugu dhacaan 30ka saacadood toddobaadki ama ka badan ee ayna noqdaan 30 saacadood ka yar;
- aad joojiso inaad mas’uul ka tahay cunug kugu tiirsan ama qof dhalliyaro ah, tusaale ahaan haddii aysan adiga si caadi ah kula nooleen;
- qof yar ee qooyskaaga ka mid ah ayaa joojijay inuu u qalmo taageerida gunnada canshuurta. Kani wuxuu dhici karaa haddii qofka dhallinyarada ah ka tago waxbarashada horusocodka ah ee waqtiga buuxa ama ay iskooda u bilaabeen inay codsadaan Gunnada Awood-xumidda ama kaalmada dakhliga;
- cunug kugu tiirsan ama dhallinyaro ah u dhinto.

Isbedellada kale ee ku yimaado xaaladaha ma aha in laga soo warbixiyo ilaa dhammaadka sanadka. Si kastaba ha noqotee waa dantaada inaad uga soo warbixisid si degdeg ah isbeddelada qaarkood. Waxaa jiro nidaamka ah in 3 bilood dib loogu celin karo taariikhda oo micnaheedu yahay inaad dhimin kartid lacag haddii aad dib ula soo dhacdid u soo sheegidda xafiiska Canshuurta ee ku saabsan isbeddelka kordhinaayo Gunnada Canshuurtaada ee xaqqa aad u lee-dahay. Qaybta kale ee horey looga soo hadley ee “Waxaa la tixgeliyo markii la xisaabaayo abaalmarinta gunnada canshuurtayda?” wuxuu ku siinayaa faah-faahin kooban ee noocyada xaaladaha ee wax-yeelayn karo abaalmarintaada.

Helidda koowaad ee DLA ama helidda DLA oo la kordhiyay

Waxaa jiraan qaar laga reebay xadaynta 3 bilood ee dib ugu celinta taariikhda. Haddii la siiyay cunuggaada DLA ama ay jirto weli in abaalmarinta DLA la kordhiyay ilaa tirada ugu sarayso xanaanaynta shakhsiga, tan waxay keeni kartaa Gunnada Canshuurta Cunugga oo dheraad ah. Markii aad u soo coodsanaysid cunuggaada DLA (ama aad soo waydiisanaysid in la kordhiyo abaalmarinta) hubi inaad la socodsiidid xafiiska Gunnada Canshuurta si oo u ogaado. Intii aad u soo sheegaysid xafiiska Gunnada Canshuurta inaad sidaan samaynaysid oo aad la soo xiriiraysid si aad ugu soo wargelisid markii aad helaysid abaalmarinta, canshur kasto amah dheeri ah waxaa dib loogu celin karaa taariikhda sida tan DLA, xitaa haddii ay ka sii badan tahay 3 bilood. Waa inaad qaaddaa tilaabooyin la mid ah haddii adiga ama lamaanahaada aad qabtaan dhibaatooyin caafimaad oo iskiin u soo codsaneysiin DLA .

Haddii ay isbeddelka xaaladaha ay wax ka dhimayso abalmarinta Gunnada Canshuurtaada, waxay dhimistaasi mar kasto loogu celinayaa dib taariikhda si buxdo. Haddii aad jeceshahay inaysan kugu imaan bixin hoos u dhac ah ama bixin saa'id ah waa inaad la soo socodsiidid xafiiska Gunnada Canshuurta wax kasto ee ku saabsan isbeddelada xalaadaha sida ay u dhacaan.

Isbeddelada dakhliga

Haddii uu ku yimaado isbeddel dakhliga, waxaad dooran kartaa inaad ugu soo sheegtid si toos ah xafiiska canshuurta ama ku dayn kartaa ilaa dhammaadka sanadka canshuurta. Haddii dakhligaaga sanadlaha ah u kor u kaco wax-yeelayn kuma lahaanayo abaalmarinta aad sandkaan qaadato haddii uu ka badnayn £25,000. Haseyeeshee dakhligaas dheraadka ah waxaa lagu xisaabi doona gunnada canshuurta ee sanadka canshuurta xigo. Haddii aad doorato inaad soo wargeliso sanadka markuu dhamaado, waxaad halis ku jirtaa in lacag dheraad oo ku meel gaar ah lagu siiyo intii aad ka sugayso cusboonaysiinta codsigaaga (ka fiirso qaybta horey looga soo hadlay ee 'Dhammadka sanadka canshuurta'). Tani waxaa sabab u ah in abalmaarinta ku meel gaarka ah ee la bixiyo qaybta horey ee sanadka canshuurta cusub lagu xisaabiyo dakhli hooseeyo. Tan kale, haddii aad jeceshahay inaysan kugu imaan bixinta saa'idka ah ama hoos u dhaca bixinta ee Gunnada Canshuurta waxaa dantaada ah inaad soo wargelisid kor u kaca ama hoos u dhaca ku imaanayo dakhliga.

Maxaa dhacaayo haddii aan helo gunnada canshuurta oo badan

Haddii wax badan laga bixiyay Gunnada Canshuurta, xafiiska Canshuurta waxuu sida caadiga ah ku waydiisanayaa in la soo celiyo bixinta dheeriga ah isaga oo ka dhimaayo bixinta Gunnada Canshuurtaada.

Xafiiska Canshuurta (Revenue) waa inuusan dib u soo celin bixinta saa'idka ah ee ku yimid 'qalad xafiiskooda sameeyey', bacdaama oo aad u ogaan Karin si macquul ah in lagugu lahaaday bixin dheeraad ah.

Waxaa kusi dheraad ah, in xafiiska canshuurta uusan dib kaaga soo celinayn haddii aad muujin kartid inay kuu keeni karto dhib.

Soo dalbo talosiin dheeri ah haddii xafiiska Canshuurta kuu soo sheegay inay jirto lacag kugu korortay ama ay u muuqato inay lacagtu kugu sii kororayso. Haddii aad dood ka qabtid oo ah inay bixinta korortay ama dood ka qabtid xisaabta bixinta korortay waxaad ka qaadan kartaa racfaan. Si kastaba ha noqotee haddii aad oggolaatid inay jirto bixin korortay, ma jiraayo xaqqa racfaan ka qaadashada go'aanka xafiiska canshuurta si loo soo celiyo lacagta. Waxaa taa beddelkeeda soo waydiisan kartaa inay isticmaalaan caqligooda inay dib ula soo noqon. Haddii ay ku adkaystaan inay lacagta soo ceshtaan waad ka dacwoon kartaa adiigoo isticmalayo habka cabashada ee Canshuurta. Haddii aadan oggoolayn inaad dib u soo celiso qalad ka yimid xafiiskooda, waa inuu xafiiska Canshuurta joojiyaa dhimista lacagtaada ilaa ay go'aan ka gaaraan.

Contact a Family waxuu soo saaraa hage yar ee Gunnada Canshuurta ee daboolaayo arrimahaan si aad u faah-faahsan. Waxaa si bilaash ah laga heli karaa khadka caawinaadda.

Sidee u heli karaa in wax laga beddelo go'aanka Gunnada Canshuurta?

Waxuu xafiiska canshuurta dib u eegi karaa go'aanka haddii ay jirto isbeddel ku yimaado xaaladaha, haddii ay sameeyeen qalad, ama haddii ay u malaynayaan in abaalmarintaada tahay qalad. Haddii aadan oggolayn go'aanka xafiiska canshuurta waxaad ka qaadan kartaa racfaan. Waqtiga u xadaysan qaadashada racfaanka waa 30 maalimood laga soo bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray. Racfaanka waa inuu ahaada qoraal waana in lagu soo caddeeyaa sababaha aad uga qaadanaysid racfaanka. Waxaa racfaanada lagu soo samaysan karaa foomka TC623, oo laga

helaayo dhammadka buugga yar ee WTC/AP lagana heli karaayo xafiiska Canshuurta. Aan ka ahayn inaad soo bixinaysid isbeddel ku yimid xaaladaha waxaa inta badan fiican inaad soo waydiisatid racfaan intii aad soo wadydiisan lahayd dib u eegid. Sababtuna waxay tahay in waqtiga racfaan qaadashada uu yahay 30 maalimood oo aan la kordhinayn haddii aad soo waydiisato dib u eegid oona la soo diido. Mar-mar waa suurto gal in racfaanada sii jiraan ila iyo hal sano iyo 30 maalimood ka dib go'aanka. Si kastaba ha noqotee, waxaa racfaanka soo daahay lagu siiyaa markay ' ay jiraan xaalado gaar ah', sidaasi darted waa inaad had iyo jeer isku daydaa oo aad hubisaa inaad wax ka qabatid waqtiga caadiga ah ee racfaanka laguu siiyay.

Gunnada Canshuurta iyo caawinaadda kale ee qooysaska dakhliga hooseeyo

Talosiin faahfaahsan oo ah sida codsiga Gunnada Canshuurta u taabanaayo kaalmo kasto oo haatan qaadatid fadlan wac Khadka caawinaadda bilaashka ah.

Kaalmada Dakhliga (IS) iyo Gunnada Shaqo-doonka ku salaysan dakhliga (ibJSA)

Waxay Gunnada Canshuurta Carruurta beddelaysaa lacagta la siiyo carruurta ee IS ama ibJSA. Ka fiiri daaqadda kore faah-faahin dheraad ah ee ku saabsan 'Gunnada Canshuurta iyo qooysaska qaato Kaalmada Dakhliga (Tax Credits and families on Income Support).

Kaalmada Guriyeenta iyo Kaalmada Canshuurta Guudiga

Bixinta Gunnada Canshuurta ee haatan jiro waxaa loo xisaabaa inay yahiin kaalmo (ka ahayn markii aad jirtid 50 sano ama aad ka wayn tahay 60 markaa ma la tixgeliyo) markii la xisaabaayo kirada iyo canshuurta guddiga. Si kataba ha noqotee, bixinta daynta kirada ee Gunnada Canshuurta inta badan ma la tixgeliyo. Kala soo xiriir Khadka Caawinaadda waxii talosiin dheeri ah.

Kaalmooyinka Caafimaadka

Waxaad heli kartaa kaalmo buuxdo oo ah kharashka ku baxo caafimaadka haddii canshuur sanadeedka ee dakhligaada ka sii yar yahay bir-biloowga taagan oo aadna heshid:

- Gunnada Canshuurta Shaqada; ama
- Gunnada Canshuurta Shaqada oo uu la socdo quudka curyanimada; ama
- Gunnada Canshuurta carruurta laakin xaq uma lihid in aad qaadato Gunnada Canshuurta ee Shaqaalaha.
- Bir-biloowga sanadlaha waa £15,050 waqtiga kani la soo qoerey.

Warqadaha lagu qaato caano lacag la'aan ah, miro iyo khudaar

Haddii uur leedahay aad haysatid cunug ka yar afar jir, aad hesho Gunnada Canshuurta Carruurta (laakin aadan helin Gunnada Canshuurta Shaqada) oo aad lee-dahay canshuur sanadeedka ka yar £15,575 waxaad xaq u yeelanaysaa warqadaha (vouchers) lagu qaato caano, miro iyo khudaar. Waxaad sidoo kale u heli kartaa fitaamiinooyin lacag la'aan ah. Waxaa cawinaaddaan bixiyo Healthy Start Scheme, waxaana macluumaad kale ee ku saabsan sida aad u heli kartid vouchers'ka laga heli karaa Healthy Start Helpline lambarka telefoonka 0845 607 6823 ama boggooda internet'ka www.healthystart.nhs.uk.

Cuntada Dugsiga oo lacag la'aan ah

Waxaad awood u yeelanaysaa inaad heshid cuntada dugsiga oo ah lacag la'aan haddii aad xaq u lee-dahay CTC (laakin aan xaq u leheen Gunnada Canshuurta Shaqada) ayna canshuur sanadeedka dakhligaada ka yar yahay £15,575.

Kharashka Hooyanimada iyo Kharashka Duugta ee Sure Start

Waxaad xaq u lee-dahay inaad soo codsatid kuwaan haddii aad qaadatid:

- WTC oo la socodo curyaanimo ama quudka curyaanimada aad u xun;
- CTC tiro ka sarayso ' quudka qooyska' ee aasaasiga ah'.

Kala soo xiriiridda wararka dheeriga ah iyo talosiinta

Haddii aad jeceshahay talosiin dheeri ah ee ku saabsan Gunnada Canshuurta ama kaalmooyinka badbaadinta bulshada fadlan soo wac **Khadka Xiriirka Qooyska (Contact a Family Helpline): 0800 0808 3555** (Maalmaha shaqada,10ka maalintii-4ta galabtii iyo habeenada Isniinta 5:30ka galabtii ilaa 7:30 habeenkii) e-mail: helpline@cafamily.org.uk Contact a Family waxaa u shaqeeyo qof xuquuqda barwaaqaynta ku takhasusay oo kaa siin karo talo faah-faahsan ee ku saabsan dhinac kasto ee ah codsiga gunnada canshuurta. Warqadda xaqiiqada ah waa mid ka mid ah waxyaabaha ay soo saartay Contact a Family oo ay ku jiraan '*Kaalmooyinka, Gunnada Canshuurta iyo gacansiinta maaliyadeed oo kale' iyo Shaqaynta.* Haddii aad doonaysid nuqulo, oo aad doonaysid inaad ogaatid waxa ay ku saabsan yahiin warqadaha kale, soo wac Contact a Family Helpline.

Talo ku bixinta telefoonka xitaa waxaa laga heli karaa **Carer'sLine: 0808 808 7777** (Arbacada iyo Khamiista, 10ka-12ka & 2da-4ta).

Haddii aad jeceshahay inaad ula hadashid qof fool-ka-fool markaa waa inaad isku daydid inaad la xiriirtid Xafiiska Talosiinta Muwaadanka (CAB) ama mashruuca xuquuqda barwaaqaynta.

Waxaa la xiriiri kartaa **Xafiiska Canshuurta Boqoradda Khadka Caawinaadda (Her Majesty's Revenue and Customs Tax Credit Helpline: 0845 300 3900) (**telefoonka qoraalka 0845 300 3909). Waxay khadadka furan yahiin laga bilaabo 8subaxnimo-8habeenimo 7 maalmood toddobaadkii.

Soo saarey: Contact a Family, 209-211 City Road, London EC1V 1JN Tel. (020) 7608 8700
Reg. Charity No. 284912
© Contact a Family 2008
Waxaa qorey Derek Sinclair
Contact a Family wuxuu ku mahad-celinaaya Qaybta Canshuuraha iyo Dakhliga Boqoradda caawinaadda maaliyadeed ay ku siiyeen soo saaridda warqaddaan xaqiiqada ah.